Spot It. Help Stop It
SOMALI

Garo, oo caawi si loo joojiyo

KA HORTAGA WAXYEELADA ILMAHA IYO DAYACAADA

WAXYAALO KU SAABSAN WAXYEELADA CARRUURTA IYO DAYACAADA

Dhammaan carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay noolaadaan rabsaho iyo waxyeelo la'aan.

Nasiib darro, waxyeelada carruurta iyo dayacaadeedu way socotaa waana arin ka jirta Australia oo dhan.

Waxyeelada carruurta iyo dayacaadoodu waxay natiijo xun ku reebaan ilmaha keliya ma aha, laakiinse qoysaskooda iyo bulshooyinkooda.

Waxyeelada ilmaha iyo dayacaadu waxay ku dhici kartaa ilmo kasta ama qof dhalinyara ah oo qoys kasta ka tirsan. Way waxyeeleysaa waxayna leedahay.

Carruurta la kulanta waxyeelo iyo dayacaad waxaa laga yaabaa inay noqdaan kuwo aan faraxsaneyn iyo dad waa weyn oo xanaagsan oo kalsoonida ay isku qabaan hooseyso. Carruurta qaarkood xitaa waa dhintaan waxyeeladaas awgeed.

Mar mar ka qaarkood carruurta waa la dhaawacaa ama khatar ayey ugu jiraan in la waxyeeleeyo sababtoo ah:

- Sababtoo ah qoysaskoodu ma heystaan taageero ku filan
- Xannaaneeyayashoodu waxaa heysta caddaadis fara badan oo shaqo la'aaneed, jiro, takoorid ama cidlo.
- Waalidkood laftigooda ma soo arag waalidiin fiican.

Waa laga hortegi karaa waxyeelada carruurta iyo dayacaadooda.

Si aad uga soo warbixisid ilmo khatar ugu jira waxyeelo ama dayacaad, lala xiriis Khadka Taleefanka Caawimaada ee 132 111

WAA MAXAY WAXYEELADA CARRUURTU?

Waxaa jira noocyo kala duwan oo carruurta loo waxyeeleeyo. Kuwaas waxaa ka mid ah dayacaad iyo waxyeelo jireed, maskaxeed iyo galmo.

Dayacaadu waa ku guuldareysiga joogtada ah ee waalidka ama xannaaneeyaha oo ah siinta ilmaha waxyaalaha aasaasiga ah ee loogu talagalay koritaankiisa iyo harumarkiisa haboon, sida cunto, dhar, hoy, daryeelka caafimaad iyo ka ilkahaba iyo kormeer ku filan.

Waxyeelada jireed waa dhaawac aan aheyn wax loola qasday ama noocyo dhaawacyo oo uu u geysanayo ilmaha Waalidku, xannaaneeyaha ama qofkasta oo kale. Waxaa ka mid ah dhaawacyada ayey sababaan edbinta xad dhaafka ah, garaacida daran ama ruxitaanka, bugeyna, dhakhrida ama bararinta, gubitaanka, jebinta Ama sababida inay meeli kala baxdo, iskuday ceejineed iyo guditaanka gabdhaha. Mar marka qaarkood dhaawacyadan waa kuwo khatar loo dhiman karo.

Waxyeelada carruurta iyo dayacaaduba waa dambi

Waxyeelada maskaxeed waa dabeecad uu leeyahay walid ama xannaaneeye oo lumineysa ilmaha
kalsoonidiisa oo natiijo ahaan keeni karta waxyeelo saameyn weyn ku yeelata maxkaxdiisa ama shoog leh. Tan waxaa ka mid ah dabeecado badan sida eedeyn xad dhaaf ah, ka ceshadka kalgacalka, arga uu arko rabshada gudiga, baqdin gelin ama dabeecad hanjabaad leh.

Waxyeelada galmada waa marka qof weyni ama qof ka xoog badan ama ka weyn da' ahaan uu ilmo la yeesho fal galmo isagoo isticmaalaya awoodiisa ilmaha ama ka faa'iideysanaya kalsoonida ilmaha uu kuqabo. Badanaa carruurta waa la laaluushaa.

DoCS
NSW Department of Community Services

MAXAAN SAMEYN KARAA?

Carruurta iyo dhalinyarada ahi waxay xaq u leeyihiin inay ammaan ku helaan guryahooda iyo bulshada dhexdeedaba.

Ka ilaalinta carruurta iyo dhalinyarada wixii dhib ah waa masuuliyada qof kasta. Carruurta iyo dhalinyarada waxaa laga ilaalin karaa oo keliya waxyeelada iyo dayacaada haddii dadka waa weyn ee masuulka ahi ay talaabo qaadan xaggooda.

Soo sheegida wixii aad ka saluugsan tahay ee ku saabsan ammaanka iyo wanaaga ilmo iyo qof dhalinyaro ah waa talaabada ugu horeysa ee ka hortaga ama joojinta waxyeelada iyo ilaalinta carruurta wixii dhibaato ah ee dheeraad ah. Waxay sidoo kale siineysaa Wasaarada Adeegyada Bani'aadamka ee NSW (DoCS) fursad ay ku caawiyaan qoysaska ku jira xaalado uu ilmuhu ama qof ka dhalinyarada ahi laga yaabo inuu khatar ku jiro.

SIDEE BAAN U SOO SHEEGAA WAXYEELADA CARRUURTA IYO DAYACAADA?

Haddii aad u maleynayso in ilmo ama qof dhalinyaro ahi inuu dayacan yahay ama jar ahaan, galmo ama maskax ahaan la waxyeelaynayo, waa inaad isla markiiba u soo sheegtaa DoCS. Calaamadaha suurto galka ah ee waxyeelada carruurta iyo dayacaada waxaa lagu dul marey qaybta ugu danbeysa ee buuggan yar.

Waad soo sheegi kartaa adoo taleefan u soo diraya DoCS' Khadka Taleefanka Caawimaada 132 111 oo kugu kacaya kharashka wecitaanka caadi ah, 24 –kii saac maalintii, 7 maalmood toddobaadkii (TTY 02 9633 7698).

Khadka Taleefanka Caawinaada ee DoCS 132 111

Warbixintaadu waxay ahaaneyso mid gebi ahaan qarsoodi ah – cidna uma sheegi doono ciddii soo sheegtay waxyeeladan ama dayacaada annaga sidoo kale ma aha inaad noo sheegto magacaaga haddii aadan dooneynin.

MAXAY SAMEYN DOONTAA DoCS?

Sharci ahaan waa inaan qiimeynaa warbixinta waxyeelada ilmaha iyo dayaca ama warbixinada carruurta laga yaabo inay khatar ugu jiraan dhibaato.

Markaad nala sooxiriirto, shaqaalahayagu wuxuu ku weydiinayaa macluumaad dheeraad ah si uu nooga caawiyo helitaanka khatarta dhibaatadan ee ilmaha ama carruurta ku lug leh.

Waxaa laga yaabaa inaan la hadalno qoyska ilmaha. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaan u baahano inaan la hadalno dad kale si aan u helno waxyaalaya kusaabsan xaaladaha qoyska.

Tusaale, waxaa laga yaabaa inaan la xiriirno macalinta ilmaha, shaqaalaha xannaanada carruurta ama qaraabo. Haddii aan u maleyno in sharciga la jebiyey waxaan la hadlaynaa boliiska. Waxaan ku xiriirineynaa ilmaha qoyskiisa adeegyo haddii ay u baahan yihiin taageero ka caawisa u xannaaneynta ilmahooda si ammaan leh.

Haddii ilmaha ama dhalinyaradu uu dhib khatar ugu jiro, waxaan la shaqeynaynaa wakaaladaha kale iyo dadka aqoonta xirfadeed leh si loo hubiyo inay ammaan leeyihiin. Haddii aan u maleynayno in ilmahu uu khatar degdeg ah ku jiro, waxaanu siineynaa meel ammaan ah oo uu ku noolaado. Waxaan had iyo jeer ka qayb gelinaa ilmaha ama qof dhalinyarada ah iy qoyska ilaa inta suurto galka ah wixii go'aamo ah ee saameynaya.

SIDEE BAAN KU OGAAN KARAA HADDII ILMAHA LA DAYACAY AMA WAXYEELEEYEY?

Waxaa jira calaamado caam ah oo jireed iyo kuwo dabeecadeed ee ilma kasta oo la dayacay ama la waxyeeleeyey (kuwani waxay ku qoran yihiin boggaga soo socda).

Jiritaanka mid ka mid ah calaamadahan taa macnaheedu ma aha in ilmaha la dayacay ama la waxyeeleeyey.

Haddii aad aqoonsato calaamadaha waxyeelada ama dayaca ee ilmo aad taqaan, xitaa ilmaha aad adigu dhashay, la xiriir DoCS' Khadkeeda Taleefanka islamarkiiba 132 111.

Marka la tixgelinayo haddii uu ilmaha la dayacay ama la waxyeeleeyey, waxaa muhiim ah in maskaxda lagu hayo xaaladaha nolosha ee ilmaha, sida:

- takoornaanta bulsho ama degaan ee ilmaha ama qoyska, oo ku jiraan xiriir la'aanta qaraabada qoyskiisa.
- Waxyeelada ama dayacaada wallaalaha
- Taariikhda qoyska ee rabshadeed, oo ay ka mid tahay rabshada guriga
- Arimo caafimaad oo maskaxeed ama jireed oo uu qabo waalidku ama xannaaneeyaha taas oo saameynaysa xannaanada ilmaha.
- Isticmaalka khamriga ee waalidka ama xannaaneeyaha ama maandooriyaha saameynaya awoodooda ay kaga

CALAAMADAHA SUURTOGALKA AH EE DAYACAADA

Calaamadaha carruurta

- Nadaafad xumo tus: ilmaha oo si joogta aan isu dhaqin
- Qaraabashada ama xadida cuntada
- Wax badan joogitaan ka dugsiga, meelaha dadweynaha ama guryaha kale
- Kalkacalka qofka weyn oo uu aad u dherersado
- Culeyskiisa oo hooseeya marka da'diisa loo eego
- Dhibaatooyin jireed oo aan la daaweyn tusaale. Nabaro aan la daaweyn, nabarada neebka ama kaadin
- Is ruxid, nuugid ama madaxa la dhicid
- Walaac in laga tegayo oo kale
- Ku guuldareysgai koritaanka iyo horumarkaba
- Xooga saarida waxyaalaha aasaasiga ah ee lagu noolaado
- Midab xun ama aan dhallaal lahayn iyo timo aragti xun

Calaamadaha waalidka ama xannaaneeyayaasha

- Ku guuldareysiga siin la'aanta cunto ku filan, hoy, dhar, daaweyn ama xaalado guri oo nadiif ah
- Ka tegida ilmaha isagoon haysan dusha ka ilaalin ku haboon
- Awood daro xagga u jawaabida ilmaha maskax ahaan
- Ka tegida ilmaha keligii
- Ka heyshada istaabashada jirka ama ama kicinta ilaa muddo dheer
- Ku guuldareysiga inaad siiso kobcin nafsiyeed
- Kula macaamilada hal ilmo si ka duwan wallaalihiisa kale

CALAAMADAHA SUURTO GALKA AH EE WAXYEELADA JIRKA

Calaamadaha carruurta

- Difeeto wajiga, madaxa iyo qoorta ah
- Dakhar iyo barar ka dhashay edbin xad dhaaf ah
- Sharaxaada dhaawaca uu bixiyey ilmuhu wax la xiriirta ma aha dhaawaca

- Difeetada kale iyo calaamadaha ee laga yaabo inay dhaliyaan tusaale, qadhabida suunka, gacanta lagu dhuftay oo kusawiranta
- Calaamadaha qanniinyada iyo xoqitaanka
- Unugyada gudaha oo dilaaca iyagoon lahayn wax taariikha dhibaato shook oo weyn
- Lafa jabay, gaar ahaan carruurta ka yar saddex sanno
- Gubasho iyo dhaawac biyo galeen
- Dhaawaca madaxa oo laga yaabo inuu ilmuhu muujiyo calaamado sidii wax hurdeysan, matag, qalal ama indhaha oo dhiiga, oo sheegaysa in laga yaabo in ilmaha la ruxay
- Dhaawacyo fara badan ama difeetooyin
- Liqitaanka waxyaalo sun ah, khamri ama daroogooyinka kale ee khatarta leh
- Kala baxa, dhaawaca seedaha, murkacashada
- Tilmaamayaasha guud ee gudniinka gabdhaha oo ay ka mid noqon karto yeelashada qaliin khaas ah, dhib kala kulmida musqusha tegideeda iyo diidmaha inay ka qayb galaan cayaaraha ama nashaadka kale ee jireed ee uu ilmuhu hore u xiiseyn jirey.

Calaamadaha waalidka ama xannaaneeyaha

- In waalidka ama xannaaneeyuhu uu si toos ah u qirto inay ka baqayaan dhaawicida ilmahooda
- Taariikhda qoyska ee rabsho
- Taariikhdooda sida xun ee loola dhaqmay ilmo ahaan
- Booqashooyin soo noqnoqda oo ilmaha ama carruurta la geeyo caafimaadka ama adeegyada kale oo leh dhaawacyo shaki leh oo aan la sharxin, liqitaanka waxayaalo aan cunto ahayn ama cabashooyin kale oo jireed.

CALAAMADAHA SUURTOGALKA AH EE WAXYEELADA MASKAXEED

Dhammaan noocyada waxyeelada dhibaato ee carruurta nafsad ahaantooda, laakiin ereyga ' waxyeelada maskax ahaaneed waa dabeecad burburineysa ilmaha kalsoonidiisa.

Calaamadaha carruurta

- Dareenka ah inaan noloshu wax qiimo ah la lahayn iyo nafsadooduba
- Awood la'aanta qiimeynta dadka kale
- Ku kalsoonaan darada dadka
- La'aanta xirfadha dadka ee laga ma maarmaanka u ah hawl maameedka
- Dabeecad dheeraad ah oo uu ilmuhu ku raadinayo in isaga dareen la siiyo oo loo soo jeesto
- Dhibaatooyinka kale ee dabeecadeed tusaale. U xoogsheegashada, rabshid badni, dagaal badni
- Aragiisa rabshada qoyska

Calaamadaha waalidka ama xannaaneeyayaasha

- Si joogta au u eedeynta, yareynta, dacaayadeynta ama ilmahaas is ilaawsiintiisa, ama ka haysashada ammaanta iyo dareen siinta
- Weydiinta xoogan ama aan macquulka ahayn
- Cadaawad joogta ah, waxyeelo af oo daran, diidid iyo ku eedeynta waxyaalo kale oo uusan sameyn
- Rumeynta in ilmo khaas ahi uu xun yahay ama ' wax xun'
- U isticmaalida ciqaab ahaan takoorid bulsho ama mid jireed oo aan habooneyn
- Rabshada guriga

CALAAMADAHA SUURTO GALKA AH EE WAXYEELADA GALMADA

Calaamadaha carruurta

- Sharaxaada falalka galmada tusaale '_____ Waxay wax yeeshaa kaadidayda
- Kuu sheegaya wax ku saabsan, si toos ah ama si aan toos ahayn
- Dabeecad nafsada burburineysa tusaale, la qabsiga daroogada, iskudayga isdil, googoynta nafsadiisa
- Sariirta tegideeda isagoo dharkiisa oo dhan gashan
- Cunto rabitaanka oo ka luma ama cunida cunto dheeraad ah
- Difeetada ama ka dhiigida goobta xubnaha taranku ku yaaliin
- Infekshinada galmada laysugu gudbiyo
- Difeetada naasaha, badhida, uurkujirta hoose ama bowdyaha
- Uur dhalinyaranimo
- La xiriirida qof la yaqaan ama mid looga shakisan yahay waxyeelayo u galmood
- Haysashada keyd lacageed iyo hadiyado aan wax sharaxaada lahayn meeshii ay ka yimaadeen
- Ku adkeysiga ka cararka guriga
- Dabeecad gadaal noqod leh sida dib ugu noqosho dhakhsa ah isku kaadinta ama ciid cunida
- Dabeecad galmo oo aan ku habooneyn ilmaha da'dooda

Calaamadaha waalidka iyoxannaaneeyayaasha

- U muujinta ilmaha dhileysi ama sawiro dad isu galmoonaya ama u isticmaalida ilmaha ujeedooyin sawir ka qaadid wax isu galmoonaya
- Si ula kac ah ugu muujinta ilmaha dabeecadaha galmo ee dad kale
- Xukumitaan maxkamadeed oo hore kuna saabsan waxyeelo u galmood ilmo
- Ku shasbida ilmaha inuu galo dabeecad u galmood carruur kale
- Hanjaad afka ah oo waxyeelo galmadeed
- Beeninta uurka qofka dhalinyarada ee qoyska.W Depart

Si aad uga soo warbixiso qof dhalinyaro ah ama ilmo khatar ugu jira waxyeelo ama dayacaad la xiriir

Khadka Caawimaada DoCS 132 111

TTY (02) 9633 7698

www.community.nsw.gov.au

ISBN 0 7310 4323 5
August 2005